

Manfacyada Cunto ama Lacagta Caddaanka ah ee DSHS Your DSHS Cash or Food Benefits

MAGACA MACMIILKA (MADAXA QOYSKA)

LAMBARKA AQOONSIGA EE MACMIILKA

Deeqaha Lacagta Caddaanka ah ee DSHS TANF, Lacagta Caddaanka ah ee Qaxootiga, Lacagta Caddaanka ah ee ABD, Weecashada Lacag	Manfacyada Cunto ee DSHS
<p><input type="checkbox"/> Ujeeddo DSHS waxay siisaa deeq lacag caddaan ah dadka degan ee u-qalma barnaamijyada gargaarka dadweynaha. Manfacyadan waxay kugu caawinayaan in aad ku bixisid kharashaadka noolasha aasaasiga ah (RCW 74.04.770).</p> <p>Deeqda lacagta caddaanka ah ee TANF waa in kaliya loo isticmaalaa manfaca carruurta aad daryeeshid. Waxaan u baahan karnaa caddayn ah in aad u isticmaalaysid deeqdaada TANF baahida carruurtaada (RCW 74.12.260).</p>	<p><input type="checkbox"/> Ujeeddo Barnaamijyada gargaarka cunto ee DSHS waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Cuntada Daruuriga ah. • Barnaamijka Gargaarka Cunto ee loogu tala galay muhaajiriinta sharciga ah (FAP) • Mashruuca Isu-geynta Codsiga Washington (WASHCAP). • Gargaarka Cunto ee Marxalada kala guurka (TFA). <p>Barnaamijyadan waxay gargaar siinayaa dadka dhakhligooda yar yahay si ay ugu iibsadaan cuntokaararka xawilaadda manfacyada elektirooniga ah (EBT).</p>
<p><input type="checkbox"/> Isticmaalka Habboon Waxaad u isticmaali kartaa deeqdaada lacagta caddaanka ah kharashaadka noolasha sida:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Hooy • Shidaal • Cunto • Gaadiid • Dhar • Dayac-tirka guri • Nadaafada shakhsi • Kharashaadka shaqo 	<p><input type="checkbox"/> Isticmaalka Habboon Adiga, iyo qoyskaaga, waxaad u isticmaali kartiin manfacyadaada cunto in aad cunto oogu iibsitiin tafaariiqle u oggolaatay Wasaarada Beeraha ee Mareykanka (USDA), Adeega Nafaqada iyo Cuntada (FNS).</p> <p>Waxaad u isticmaali kartaa manfacyadaada in aad ku iibsatiid:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Rootiyada iyo badarka • Khudaarta iyo miraha • Farmaajada, caanaha, iyo waxyaabaha caanaha laga sameeyo. • Hillibyada, kalluunka, digaaga, iyo ukumaha. • Cuntooyinka badankooda marka laga reebo cuntooyinka diyaarsan ee kullul. • Iniinaha iyo geedaha soo-saara cuntada.
<p><input type="checkbox"/> Isticmaalka sharci darrada ah Marka loo eego RCW 74.08.580, Waa sharci darro in kaarka Xawilaadda Manfaca Eleكتروoniga ee (EBT) ama lacagta caddaanka ah ee laga helo kaarka EBT loo isticmaalo:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Khamaar, Khamaarka waxaa ka mid ah tikidhada bakhtiyaa-nasiibka, ciyaaraha buul taabiska, baanji boodhka, ciyaarta biingaha, tartanka fardaha, ciyaaraha kaasiinoga, iyo ciyaar kasta oo fursadeed ee laga helo RCW 9.46, 67.16, iyo 67.70. • In lagu iibsado adeegyada masawirka jirka lagu sawiro, daloolinta jirka, ama dukaanada farshaxanka jirka. • In lagu iibsado sigaar ama tubaako. • In lagu iibsado waxyaabaha aalkoloda ah. • In lagu iibsado badeecooyinka ama adeegyada: <ul style="list-style-type: none"> ○ Baararka. ○ Dukaanada biirta iyo khamriga culus. ○ Caweysyada. ○ Dukaanada khamriga. ○ Wakaaladaha waraaqaha damiinka. ○ Meelaha-ganacsiga ee khamaarka. ○ Goobaha maawelada dadka waaweyn ee ka jira jilitaanada dareenada-kacsiga leh. ○ Goob kasta ee aan loo oggolayn qof jirra da' ka yar 18 sannadood. <ul style="list-style-type: none"> ▪ Tusaale ahaan, tafaariiqleyda xashiiska halka xashiishka iyo ama badeecooyinka ku saleysan xashiishka lagu iibiyo. 	<p><input type="checkbox"/> Isticmaalka sharci darrada ah Waa sharci darro in:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Loo isticmaalo manfacyada cuntada wax kasta xataa in cunto loogu gado xubnaha qoyska ee aan sharciga ahayn. • La iibiyo, ama aad isku daydid in aad iibisid, kaarkaaga EBTga. • Aad ku baddelatid manfacyadaada, ama cuntooyinka lagu soo iibiyay kaarkaaga EBT, wax kasta oo qiimo leh (suuq-madow) Tusaalooyinka suuq-madow oo sharci darrada ah waxaa ka mid ah in manfacyada cunto lagu baddesho lacag caddaan ah, daroogo, ama hub. • Aad siisid manfacyadaada qof aan ka tirsaneyn qoyskaaga. • Aad u isticmaashid manfacyada cunto in aad ku iibsatiid waxyaabaha aan- cuntada ahayn. Tusaalooyin waxaa ka mid ah: sigaarka, tubaakada, khamriga biirta, khamriga culus, khamriga culus ee likuwarka, alaabada guriga, saabuun, waxyaabaha waraaqaha ah, fitamiino, daawo, ama cuntooyinka xayawaanka rabaayada ah. • U isticmaashid manfacyada cuntadaada in aad kubixisid koontooyinkaaga deynta.



Deeqaha Lacagta Caddaanka ah ee DSHS TANF, Lacagta Caddaanka ah ee Qaxootiga, Lacagta Caddaanka ah ee ABD, Weecashada Lacag	Manfacyada Cunto ee DSHS
<p><input type="checkbox"/> Ciqaabta Istimmaalka sharci darrada ah Haddii aad u isticmaashid kaarkaaga EBT ama lacagta caddaanka ee aad ka heshid kaarkaaga EBT si sharci darro ah ama si aan habboonayn, waxaa laga yaabaa in aan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • U xilsaarno lacag-qaate ilaalin ah oo maareeya deeqdaada lacagta caddaanka ah • U baahano caddayn ah in deeqdaada aad u isticmaashid carruurta aad daryeeshid. • Joojino manfacyadaada lacagta caddaanka ah. • In lagaa qaado tallaabo sharci ah, oo ka mid ah dambi oogid dambiilenimo. <p><input type="checkbox"/> Lacagaha lagu bixiyo Mashiinka Lacagta Bixiya ama Qabta ee iskii is wada (ATM) ee loogu tala galay lacag-bixinta EBT Marka aad isticmaashid kaarkaaga EBT si aad lacag ugu soo baxsatid mashiinka ATMka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Milkiilaha ATM ama bangiga socodsiiyaha mashiinka waxaa sidoo kale laga yaabaa in uu ku dulsaarto lacag dulsaar macaamilka ah. • Waaxda dib uma bixinayso ama lacag-celin kuma sameynayso lacagaha dulsaarka mashiinka ATMka. • Waxaa laga yaabaa in aad lacag caddaan ah ka heshid dukaamada qaarkood ayadoon lacag lagu dulsaaran. 	<p><input type="checkbox"/> Ciqaabta Istimmaalka sharci darrada ah Haddii si ula-kac ah aad si qaldan u isticmaashid manfacyadaada cunto, waxaa laga yaaba in:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Lagaaga baahanyahay in aad dib-u bixisid wixii dheefo ee suuqa-madow loogu ganacsdo. • Aaad u-qalmi waysid aadna khasaartid manfacyadaada: <ul style="list-style-type: none"> ○ Ugu yaraan hal sanno. ○ Inta noolashaada ka dhiman. ○ U qalmi waysid xataa haddii aad u guurtid gobol kale. • Ganaax lagugu soo rogo. • Lagugu soo roggo tallaabo sharci ah, oo ka mid ah dambi oogid dambiilenimo. <p>DSHS waxay wada shaqeyn la yeelanaysaa maamulada gobolka, deegaanka, iyo dawladda dhexe si ay u dambi ugu soo oogto suuqa-madow ee manfacyada cuntada.</p>
<p>Anigoo saxiixayo hoos, Waxaan oggolahay isticmaalka sharciga ah ee habboon ee manfacyada cunto iyo lacagta caddaanka ah ee DSHS ee la soo sharxay. Waxaan fahansanahay isticmaalka habboon ee manfacyada iyo ciqaabaadka ee isticmaalka sharci darrada ah. Waxaan fahansanahay xaq ulahaanshahayga manfacyada DSHS in aanan waxba laga baddelaynin haddii aanan saxiixin foomkan. Qof kasta ee saxiixi waaya foomkan wali wuxuu hoos imaanayaa barnaamijka ama ciqaabaha dambiilaha ee sharci darro u isticmaalka manfacyada.</p> <p>Waxaan fahansanahay in kaarkayga EBT uu siinaya DSHS taariikhda wax-kala gadashadeyda, oo ay ka mid tahay meesha aan ku isticmaalay kaarkayga. Waxaan fahansanahay in DSHS ay isticmaali doonto xogtan, iyo taariikhdayda ee codsashooyinka kaarar baddelashada, si ay u baarto qalad u isticmaalka deeqaha lacagta caddaanka ah ama manfacyada cunto.</p>	
SAXIIXA CODSADEHA	TAARIIKH

Diiday in uu saxiiso; Xarafka Ka Bilowda Magaca Shaqaalaha DSHS _____